



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
Ministry of Information, Culture & Tourism
Office of the Minister

SUMMAD: WWDHD/XW/09/2016

Date: 28/01/2016

Ku: Dhamaan Daladaha, ururadda bulshada iyo xarumaha
Warbaahinta Gaarka loo leeyahay ee Soomaaliya =Fadhigooda=
Og: Gudiga Barlamaanka ee Arimaha Warbaahinta, dhaqanka & Isgarsiinta =Muqdishu=
Og: Hay'adaha Caawiya Warbaahinta Soomaaliya (MSG) =Fadhigooda=
Og: Dawladaha Caawiya Warbaahinta Soomaaliya =Fadhigooda=

Uj: Soo gudbin xubnaha Gudiga Saxaafadda Soomaaliya (GSS)

Wasaaradda Warfaafinta Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya waxey ka codsaneynsaa dhammaan dhaladaha, Ururadda Bulshada iyo xarumaha Warbaahinta gaarka loo leeyahay in ay soo xushaan xubnihii uga mid noqon lahaa Guddiga Saxaafadda Soomaaliya (GSS), sida uu dhigayo Xeerka Saxaafadda Soomaaliya qodobkiisa 14aad.

Sida la ogyahay shirkii Istraatejiyada Warbaahinta Soomaaliya ee lagu qabtay Hotel Jazeera 11 - 12 January 2016 oo ay ka soo qaybgaleen Wasiiradda Warfaafinta ee heer Qaran iyo heer Dawlad goboleed, daladaha, ururadda iyo xarumaha Warbaahinta madaxa banaan iyo sidoo kale wakiilo ka socda Dawladaha iyo Hay'adaha caawiya Warbaahinta Soomaaliya waxaa lagu go'aamiyey in si deg deg ah loo dhiso Gudiga Saxaafadda Soomaaliyeed.

Hadaba, si loo dhameystiro dhismaha guddigaas lagama maarmaan u ah dhaqangelinta Xeerka Saxaafadda iyo diyaarinta xeer hoosaadka lagu faahfaahinayo qodobada xeerka Saxaafadda ee ku cad qodobka 40-aad ee xeerka, waxay Wasaaradda Warfaafinta ee Dowladda Federaalku mar labaad ka codsaneynsaa dhammaan ururada bulshada, suxufiyiinta Soomaaliyeed iyo cidii ay khuseyso in ay muddo 10 cisho gudahood ah oo ka bilaabmayso 01 February 2016 ku soo gudbiyaan xubnaha ay u arkaan inay uga qeybgalaan Guddiga Saxaafadda Soomaaliya (GSS). Xubnaha naga dhiman ee aan ka sugayno dhinacyada warqadani ku socoto waa lix (6) xubnood oo ka kala imaanaya, 3 xubnood Suxufiyiinta iyo Warbaahinta gaarka loo leeyahay, iyo 3 oo ka kala imanaya hal xubin ururada Xuquuqul Insaanka, hal xubin ururada Haweenka iyo hal xubin ururada Qareenada Soomaaliyeed.

Ugu dambeyn, Dawladaha iyo dhammaan hay'adaha taageera Warbaahinta Soomaaliya waxaan ka codsaneynaa inay kaalin firfircoon ka qaataan sidii ay warbaahinta madaxabannaan iyo ururada bulshada u soo xuli lahaayeen xubno u qalma howshan culus ee loo igmanayo.

Mahadsanidin

Hon: Maxamed Cabdi Xayir
Wasiirka Warfaafinta, dhaqanka iyo Dalxiiska

